

## **Siyaasadda JJIC- U-qalmitaanka / Heerarka Ugu yar ee Ka Qaybqaadashada**

### U-qalmitaanka

Ardaygu wuu isku dayi karaa ciyaarta ama in uu noqdo hormuude ciyaartooy haddii uu buuxiyo heerarka u-qalmitaanka ururka ciyaartooyda:

1. Dhammaan ciyaartooyda oo dhan waxay la kulmi doonaan Ururka Howsha Dugsiga Sare ee Colorado (CHSAA) baahiyada u-qalmitaanka.
2. Dhammaan ardayda oo dhan waxaa si todobaadla ah loo siinayaa shahaado si ay ugu hoggaansamaan baahiyada u-qalmitaanka ee CHSAA.
3. Dhammaan ardayda oo dhan waxay ahaanayaan liisas kumbuyuutar ah oo lagu oggaanayo u-qalmitaanka ardayga si darajooyinka loo ilaaliyo muddada buundada la calaamadeynayo.
4. Dhammaan nidaamyada ciyaarta waa kuwo la heli karo si ay u caawiyaan ardayda arrintu ku adag tahay.
5. Dhammaan ardayda ah heerka sagaalaad waxay ahaanayaan kuwo -qalma xilliyada dayrta iyo jiilaalka in ay la kulmaan baahiyada CHSAA. Laga bilaabo xilliga gu'a, ardaydu waxaa looga baahan yahay in ay si dheeri ah ula kulmaan Degmada u baahan 2.0 heerar ah sidoo kale heerar aqbalaada CHSAA.
6. Ardayga ciyaartooyda ah ee dhigta heerar 10ka illaa 12ka waxay u-qalmin doonaan sidaan socota:
  - a. Ardayda haysata heer dhibic 2.0 oo dhex dhexaad ah (GPA) dhammaadka sannad dugsiyeedkii labaad ee hore waxay xaq u yeelan doonaan xilliyada dayrta iyo jiilaalka soo socda illaa ay ayagu kaga guuldareystaan buuxinta baahiyada toddobaadlaha ah ee aqbalaadda.
  - b. Ardayda aan haysan dhibic 2.0 GPA dhammaadka sannad dugsiyeedkii labaad ee hore waxay xaq u yeelan doonaan xiliga dayrta soo socda illaa CHSAA ku waajibiyo in ay taariikh shahaado ay dib u samaystaan laakiin looga baahnaan doono in ay haystaan shahaado 2.0 GPA maalinta taariikhdaasi. Haddii aanan shahaado la siin dhammaadka muddada calaamadaynta ugu horeysa, ardaygu wuxuu noqonayaa mid aanan u-qalmin inta xilliga dayrta ka harsan.

Ciyaarta Teeniska iyo mida goolofka dadka ciyaara waxaa looga baahnaan doonaa in ay haystaan shahaado dhibicdaan ah 2.0 GPA dhammaadka toddobaadka afaraad ee iskuulka. Haddii aanan shahaado qaadan, waxay ahaan doonaan kuwo aanan u qalmin illaa uu xiliga ka dhamaado.

  - c. Ardayda aan haysan dhibicda 2.0 GPA dhammaadka sannad dugsiyeedkii labaad ee hore waxay xaq u yeelan doonaan xilliga dayrta soo socda illaa uu ka dhamaado sannad dugsiyeedka koowaad ee hada ah laakiin waxaa looga baahnaan doonaa in uu haysto shahaado dhibicdaan ah

2.0 GPA ee taariikhdaasi. Haddii aanan shahaado qaadan dhammaadka sannad dugsiyeedka koowaad, waxay ahaan doonaan kuwo aanan u-qalmin inta xiliga dayrta ka dhiman.

d. Ardayda haysata dhibicda 2.0 GPA dhammaadka sannad dugsiyeedka koowaad waxay noqon doonaan kuwo u-qalma dhammaan xilliga gu'a oo dhan aan ka ahayn haddii ay ku guuldaraystaan kullanka toddobaadlaha ah ee baahiyada u-qalmida.

e. Ardayda aan haysan dhibicda 2.0 GPA dhammaadka sannad dugsiyeedka koowaad way u-qalmi doonaan illaa uu CHSAA ku amro in ay samaystaan taariikh shahaado dib ugu qaadanayaan laakiin waxaa looga baahan yahay in ay haystaan shahaado dhibicdaan ah 2.0 GPA taariikhdaasi. Haddii aanan shahaadadu qaadan dhammaadka muddada calaamada seddaxaad, ardayga wuxuu noqon doonaa mid aanan u-qalmin inta ka dhiman xilliga gu'a.

7. U-qalmida noqoshada hormuud ciyaartooy waxyaabaha la iskaga baahan yahay waxay yihiin sidaan soo socota:

a. Musharixiinta waa in ay haystaan 2.0 GPA dhammaadka sannad dugsiyeedka koowaad.

b. Musharixiinta waxay iska qori doonaan shan fasal (25 saacadood) sannad dugsiyeedka ka horeeyay imtixaanka waxayna iska qori doonaan shan fasal (25 saacadood) ku mana dhici karaan wax ka badan hal fasal (shan saacadood) wakhtiga imtixaanada.

c. Hormuudayaasha ciyaartooyda waxay la kul mayaan baahiyadii u-qalmida oo kale ciyaartooy ahaan waxaana shahaado loo siiyaa isla qaabkii ardayda kale.

Nidaamka caawimaada ardayga

1. Hawl qaabaysan oo caawimaad ah ayaa laga fulin doonaa dugsi sare kasta. Doorashooyinka waxaa ka mid noqon doona goole wax lagu barto oo loo baahan yahay, takhasusyaal uqalma, kaalkaaliye macalin, adeego la talin ah, siminaaro ciyaar ah iyo imaatinka dugsigga xagaaga ah.

2. Aqoonsi u ahaaday dhammaan ardayda ciyaaraha-khatarta-ah ayaa la go'aansan doonaa dhammaan inta lagu guda jiro toddobaadka warbixinta u-qalmidda.

3. Caawimaada kahor-xiliga way sii soconaysaa.

4. Qiimeynta wareegtada ah waxaa laga samayn doonaa xaga nidaamka caawimaada waxaana lagu samayn doonaa dugsi kasta.

La ansixiyay Maajo 1984

Loo muraajaceeyay si loo waafijiyo habdhaqanka: taariikhda ansixinta buuga tusaalaha bixiya ah  
La Muraajaceeyay: 21 Agoosto, 2008

TIXRAACA SHARCIGGA.:C.R.S. 22-32-116.5

C.R.S. 22-33-104.5 (6)

TIXRAACA KALE EE LA EEGAYO.:IHBG, Waxbarashada Gurigga ah